



JAMHUURIYADA SOMALILAND

SIYAASADDA QARAN EE MAAMULKA DHULKA

Jenuary/2022

Contents

CUTUBKA KOWAAD: SOOYAALKA SIYAASADDA QARAN EE DHULKA	4
1.0 Arrimaha Dhulka ee Somaliland	4
1.1 Sooyaalkii Dalka.....	4
1.2 Arrimaha Dhulka ee Muhiimka iyo Caqabadaha hortaagan maamulka dhulka	6
1.2.1 Arrimaha Lahaanshaha Dhulka	7
1.2.2 Arrimaha Sharciga iyo Siyaasadda.....	7
1.2.3 Maamulka iyo Maarataynta Dhulka	9
1.2.4 Muranada, iska—hor—imaadka dhulka iyo Maaratyntooda.....	10
1.2.4.1 Khilaafka Maamulka	10
1.2.4.2 Khilaafka Dhulka Gaarka Loo Leeyahay	10
1.2.4.3 Khilaafka ku saabsan Khayraadka.....	11
1.2.4.4 Khilaafka Dhulka Daaqsinta.....	12
1.2.4.5 Khilaafka Dhulka Danta Guud	13
1.2.4.6 Khilaafka dhulka ee uu sababo maalgashigu.....	13
1.2.4.7 Habka xallinta khilaafaadka iyo Hay'adaha ku shaqada leh.....	14
1.2.5 Iisticmaalka Dhulka Miyiga iyo llaalinta Deegaanka.....	16
1.2.6 Arrimaha Dhulka Danta Guud.....	16
1.2.7 Arrimaha Dhulka Magaalooinka	16
a) Firidhsanaanta Magaalada	16
b) Cashuurta dhulka iyo hantida	17
1.2.8 Suuqyada kala iibsiga dhulka iyo maalgashiga dhulka	18
2. CUTUBKA 2AAD: QAABDHISMEEDKA SIYAASADDA QARANKA EE.....	19
2.1 DHULKA HIMILADA SIYAASADDA	19
2.2 HADAFKA SIYAASADDA QARAN EE DHULKA	19
2.3 UJEEDOOYINKA SIYAASADDA QARANKA DHULKA.....	19
2.4 Mabaadii'da Siyaasadda Dhulka Qaranka	20
CUTUBKA 3AAD: BAAQYADA SIYAASADDA	20
3.1 Arrimaha lahaanshiyaha dhulka	20
3.1 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):	21
3.2 Arrimo sharci	22
3.3 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):	22
3.4 Istaraatajiyadaha (Strategies):.....	23

3.5. Maaraynta iyo maamulka dhulka.....	23
3. 6 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):	23
3.7 Istaraatajiyadha (strategies):	24
3.8 Muranka Dhulka Iyo Maamulka Xalinta Khilaafaadka Dhulka	25
3.9 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):	25
3.10 Istaraatejiyada (Strategies):	25
3.11 Maamulidda isticmaalka dhulka baadiyaha (miyiga) iyo ilaalinta degaanka.....	26
3.12 Siyaasadda kuwajahan (Policy statements):	26
3.13 Arrimaha dhulka dawladda (public land management).....	27
3.14 Baaq Siyaasadeed (Policy statement):.....	27
3.15 Istraatijiyyadda (Strategies):.....	27
3.16 Maamulka dhulka magaaloooyinka.....	28
3.16.1. Baaq Siyaasadeed (Policy statements):	28
3.16.2 Istaraatajiyadha (Strategies).....	29
3.17 Suuqyada kala libsiga iyo Maalgashiga Dhulka.....	29
3.17.1 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):	29
CUTUBKA AFRAAD: QORSHAHFA FULINTA SIYAASADDA QARAN EE DHULKA	30
4.0 QORSHAHFA FULINTA SIYAASADDA QARAN EE DHULKA	30
4.1 FULINTA QORSHE—HAWLEEDKA (ACTION PLAN).....	30
4.1.1 Isteraatijiyyadda (Strategies):	30
4.1.2 WACYI—GELINTA DADWEYNAHA IYO QAYBINTA SIYAASADDA DHULKA	31
4.1.3 Baaq Siyaasadeed (Policy Statement):	31
4.1.4 Isteraatijiyyadda (Strategies):	32
4.1.5 Baaq Siyaasadeed (Policy Statement):	32
4.1.6 Isteraatijiyyadha (Strategies):	32

Markuu Arkay: muhiimada ay leedahay Maamulka dhulka oo loo simanyahay, la isku hallayn karo ahna mid waarayaa waxa uu udub dhexaad u yahay in la helo korriin bulsho—dhaqaale oo waara iyo kobcinta iyo isku hallaynta nolosha dhaqaale ee dadka ku dhaqan Somaliland.

CUTUBKA KOWAAD: SOOYAALKA SIYAASADDA QARAN EE DHULKA

1.0 Arrimaha Dhulka ee Somaliland

Maamulka dhulka jamhuuriyadda Somaliland waxa hortaagan dhibaatooyin la xidhiidha helidda, adeegsiga, lahaanshaha, maaraynta iyo maamulka dhulka oo u baahan qorshe siyaadeed adag oo loola dan leeyahay xoojinta xuquuda qofka, qoyska iyo bulshada, kor—u—qaadista wax—soosaarka iyo ilaalinta nolosha dadka. Maamul dhul oo loo simanyahay, la isku hallayn karo ahna mid waarayaa waxa uu udub dhexaad u yahay in la helo korriin bulsho—dhaqaale oo waara iyo kobcinta iyo isku hallaynta nolosha dhaqaale ee dadka ku dhaqan Somaliland.

Inta badan dadka ku nool Somaliland waxa noloshoodu ku tiirsantahay dhulka. Dadbadan, gaar ahaan kuwa ku nool dhulka miyiga ah noloshooda waxa ay ku salaysantahay sugnaanta,sinnaan u hellidda iyo maamulka khayraadka dhulka. Sidaa awgeed, buunbuunin ma aha haddii la yidhaa dhulku waxa uu udub—dhexaad u yahay koboc bulsho—dhaqaale iyo horumarinta iyo kalsoonida nolosha dhaqaale ee dadka. Waxa baahi loo qabaa in la heio aragtay ay ka midaysanyahihiin cidda danaysa in la helo siyaasad qaran oo dhammaystiran iskuna dubba—ridan oo sal u noqota horumar qaran. Waa in dhammaan tallaabooyinka iyo istaraatijiyadaha siyaasadda qaran ay noqdaan qaar ku salaysan xog ay isla markaana bartilmaameedsadaan arrimaha muhiimka ah ee siyaasadda sida ku xusan hoos.

1.1 Sooyaalkii Dalka

Markii uu bilaabmay xukunkii maxmiyaddii Ingiriiska (1888—1960) waxaa la sameeyay Xeerarka lagu maamulo dhulka iyo in Dawladdu ay astayso muddada dhulka la kirayn karo (land tenure). Maamulkii mustacmaraddu waxa ay bilaabeen in dhulka la kiraysto. Meelaha magaaloooyinka ah sida Hargeysa iyo Burco waxaa ka hirgalay in maamulka degmadu uu diiwaangeliyo dhulka deggenaanshaha loogu talo galay iyo beeraha waxaanu bixin jiray mulkiyadda lahaanshana.

Siyaasaddii dhulka ee 1931dii uu soo saaray maamulkii Ingiriisku waxaa lagu caddeeyay in xuquuqda lahaanshaha ay bud—dhig u tahay in dhulka la beero. Dhulka beeralayda ah maamulkii Ingiriisku waxa uu dhiirri—geliyay in la bixiyo dhulkii la wada lahaan jiray si loo beero sida Gabilay, Awdal iyo Beer.

Ka sokow in la beero, dhulka qaarkii waxaa loo xidhay daaqista, calafka iyo kaymaha. Wuxuu arrintani wax ka taraysay in la yareeyo nabaadguurka iyo in aad loo isticmaalo calafka dhulka. Waxaa bilaabmay in la dhisoo Berkadaha biyaha lagu kaydiyo oo ay samaysteen dadka ladani, shaqaalaha dawladda iyo xoolo—dhaqatada si biyaha gaar loogu lahaado islamrkaana loo xidho meelaha dadweynaha ka dhexxeeya ee Beeshu ay deggen tahay. Waxaa suurto gashay in la maal—gashan karo dhulka iyo lahaanshaha biyaha gaarka loo leeyahay.

Ka sokow ceshiimooyinka (seerayaasha), waxaa haddana jiirtay oo dhaqan ahayd in dhulka la wada leeyahay oo la wada isticmaalo. Haseyeeshee dawladdii mustacmaradda iyo koboca dhaqan—dhaqaale waxa ay wax ka beddeleen hab nololeedka ahaa in ay isku xidhan yihiin dhulka iyo reerku. Arrintani waxa ay sababtay in reeruhu ay ku doodaan lahaanshaha dhulka.

Inkastoo weli la isticmaalo dhaqashada xoolaha, haddana waxaa soo kordhay isticmaalka dhulka beeralayda iyo ka ganacsiga dhulka kuwaasoo saamayn ku yeeshay dhulkii reer guuraaga iyo hab—nololeedka bulsho—siyaasadeed ee ahaa: dhulka waa la wada leeyahay waana la wada isticmaalaya.

Ceshiimooyinka ama seerayaasha oo bilaabmay markii la oggolaaday in dhulka la fasho (beerashada dhulka) ayaa sii xoogaystay iyadoo ay sababtay mashaariicdii Dawladda ee beeraha (oo ay Ingiriisku bilaabeen siina xoogaystay xilligii Siyaad Barre) taas oo qaramaysay dhulka sannadkii 1972. si loo xakameeyo in dhulka ay xaalufiyaan reer guuraagu loona joogteeyo in la heli karo daaqa, islamrkaana la xaddido dhaq—dhaqaqa Bulshada deegaanka ah. Maamulkii iyo xakamayntii dhulka ee dawladdu waxa ay ku guuldarraysteen in ay si guuli ku jirto u yareeyaan khilaafaadka dhulka, waxa ay faquuqueen bulshooyinka qaardeed sidoo kalena ka hor—yimaddeen arrimihii dhaqanka ee la xidhiidhay lahaanshaha dhulka iyo sheegashadiisii. Arrimahani waxa ay dhiirri—geliyien in shaksi kastaa uu seerayaal ama ceshiimoooyin xidho si uu gaarkiisa ugu isticmaalo.

Isticmaalka dhulka Somaliland waxa uu isu rogay in la samaysto ceshiimooyin ama seerayaal iyadoo midho laga beeraayo ama si gaar ah loo xidhanaayo. Cahdigii Siyaad Barre waxa ay dawladdu isku dayday in ay dhulka maamusho iyadoo la wareegtay dhulkii dadweynuhu wada lahaa waxaana meesha ka baxay dhaqankii ahaa in dhulka ay leeyihiin bulshada deegaanku.

Xeerarka noocan ahi waxa ay abuureen in ay iska—horyimaaddaan hab dhaqameedkii lahaanshaha dhulka iyo nidaamkii ay dawladdu xeirisay. Qabaa'ilku waxa ay dhaqan ahaan aaminsan yihiin in ay dhulka kala leeyihiin oo reer waliba uu deegaankiisa gaar u leeyahay islamarkaana uu xaq u leeyahay in uu reerkaasi dhulkiisa maamulo oo uu manaafacaadsado. Sidaas daraadeed talaabooyinkii ay qaaday dawladdii Siyaad Barre waxa ay ka hor yimaaddeen hab—dhaqankii soo jireenka ahaa ee wada lahaanshaha dhulka ee Beesha.

Nidaamkii hab maamulka iyo maaraynta dhulka ee Siyaad Barre kumay guulaysan in ay yareeyaan murannada dhulka ku saabsan. Markii ay dawladdii burburtay ee dagaalladii ahliga ahaana bilaabmeen waxaa la galay jawi cusub oo ah in dhulka loo kala yeesho si aan isu dheelli—tirnayn, in dhulka la boobo iyo in ay yaraato wada lahaanshihi guud ee dhulku.

Ka dib markii laga dhisay Somaliland sannaddii 1991, waxa soo if—baxay nidaam maamulka dhulka ah oo isku dhafan {hybrid system} oo ka kooban hab—dhaqameedka, Shareecada iyo Xeerarka dawladda oo ka qayb qaatay in la isku dheelli tiro dib—u—hagaajinta iyo deganaanshaha, ka hortagat iska—hor—imaadyada iyo qiyamka dhaqanka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa si dhakhso ah loogu baahan yahay in la helo Siyaasadda Qaran ee maamulka dhulka oo ay xukuumaddu gadhwadeen ka tahay kana shidaal qaadanysaysa astaamaha wanaagsan ee nidaamka hadda jira, waxna ka qabata gol—daloolooyinka iyo is—burinta si loo hubiyo in la helo nidaam maamulka dhulka ah oo cad oo is— waafaaqsan.

1.2 Arrimaha Dhulka ee Muhiimka iyo Caqabadaha hortaagan maamulka dhulka

Hab— Maamulka dhulka ee Somaliland waxaa hadda hortaagan caqabado iyo dhibaatooyin badan kuwaas oo kala duwan kuna xidhan hadba deegaan iyo dhaqankiisa, miyiga iyo magaaloooyinka. Hab— maamulka iyo maaraynta dhulka waxaa ku xeeran mashaakil badan oo ay ka mid yihiin fiditaanka aan qorshaysnayn ee magaaloooyinka iyo dhul beereedka oo ku fidaaya dhul daaqsimeedka; ceshiimooyinka; sheegashada dhulka magaaloooyinka; sheegashada dhulka ee qabaa'ilka; mulkiyadaha sida khaldan ee musuqa ah loo bixiyo; dhulka oo la qaaliyeeyo; isticmaalka dhulka ee aan deegaanka iyo bii'adda u fiicnayn; awoodaha maamul ee iska—hor—

imanaaya; iyadoo aanay jirin siyaasadda dhulka iyo rabitaan siyaasadeed oo lagu meet mariyo ama lagu fuliyo nidaamka.

1.2.1 Arrimaha Lahaanshaha Dhulka

Xeerarka dhulka ee hadda jira ee Somaliland iyo Dastuurka Somaliland midna si cad uma qeexaayo noocyada dhulka iyo xuquuqaha kala duwan ee la siiyay dadka dhulka leh ama kuwa la siiyay xuquuqda maamulka dhulka (dawladda iyo dhulka danta guud). Tusaale ahaan, qodobka 12(l) waxa uu dhigayaa: "Dhulku waa hanti guud oo ka dhaxeeeya Ummadda; mas'uuliyaddiisana Dawladdaa leh". Qodobkani ma kala sheegaayo Dawladda iyo Umadda waxaana mad—madowga qodobkan ku jiraa uu abuuri karaa jahawareer iyo in lagu murmo awoodaha iyo waajibaadyada kala duwan ee maamulka dhulka iyo maaraynta khilaafaadka ka dhasha dhulka ee u dhaxeeeya dadweynaha Somaliland.

Ujeeddada Siyaasadda Qaran ee Dhulka Somaliland waxa weeye in qodobka dastuuriga ah macnihiisuu uu yahay in dhammaan dhulka Somaliland uu leeyahay Qaranku islamarkaana uu uga mas'uul yahay in ay si wanaagsan u isticmaalaan dhammaan muwaadiniinta Somaliland. Siyaasadda Qaran ee Dhulka Somaliland waa in ay kala qaybisaa noocyada dhulka iyo xuquuqaha ka dhasha oo ah dhulka danta guud, dhulka gaarka loo leeyahay iyo dhulka ay Beeshu wada leedahay. Xeerarka hadda jiraa ma dammaanad qaadayaan xuquuqda mulkiileyaasha dhulka iyo dadka dhulka si shakhsii ah ama wadar ah u isticmaalaya.

1.2.2 Arrimaha Sharciga iyo Siyaasadda

Isticmaalka hababka Sharci ee kala duwan ee lagu maamulo arrimaha dhulka Somaliland weligeed way jirtay waanay jiri doontaa mustaqbalqa. Dastuurka Somaliland waxa uu aqoonsan yahay Shareecada Islaamka, Xeer dhaqameedkuna kaalin muhiim ah ayuu ku leeyahay maamulka arrimaha dhulka gaar ahaan dhulka miyiga oo ay hoosayso in laga fuliyo Xeerarka Dawladda.

Arrimaha Shareecada iyo Dhaqanku door wayn ayay ku leeyihiin maamulka arrimaha dhulka sidaas awgeed waa in Xeer kasta oo cusub oo lagu maamulayo dhulku uu tix—geliyaa doorka Xeer—dhaqameedka, Shareecada iyo Xeerarka Dawladda si ay saddexda nidaam (Shareecada, dhaqanka iyo xeerarka dawladdu) u wada shaqeeyaan. Shareecada Islaamku waa sal—dhigga dhammaan xeerarka dalka maaddaama uu dastuurku sidaas jideeyay (Qodobka 5aad). Hab—dhaqan ahaan Shareecada waxaa loo adeegsadaa arrimaha qoyska sida guurka, furriinka iyo

dhaxalka dhulka laakiin looma adeegsado dhammaan arrimaha maamulka oo idil. Shareecada Islaamku waxa ay oggoshahay xuquuqda lahaanshaha dhulka ee qof ahaan iyo wadar ahaan iyo in dhulka la wada isticmaalo. Dunida Muslimka ah nidaamka lagu lahaan karo dhulku waxa uu isugu jiraa in la raaco saddexda hab ee dhaqanka, Shareecada iyo xeerarka dawladda oo iswaafaqsan. Xeer—dhaqameedku waxa uu la mid yahay xeer—dhaqameedka waddamada qaarkood ee af—ka qalaad lagu yidhaa (common law) haddii arrin la xalliyona sida lagu xalliyay waxa ay beelaha u noqotaa marka dambe xeer.

Xeer—dhaqameedku ma qorna laakiin odoyaasha beesha ayaa qalbiga ku haya waana la iska dhaxlaa fac illaa fac. Xeerka ka dhaxeeya laba reer wuu ka duwanaan karaa xeerka ka dhexeeya laba reer oo kale ama reerka gudihiisa. Xeer—dhaqameedka waxaa lagu maamulaa arrimaha daaqsinta, calafka, kaymaha iyo biyaha ee dhulka miyiga. Bulshada Somaliland ee reerguuraaga ahi kuma dhaqmaan in dhulka loo kala leeyahay hadba sida loogu soo kala horreeyo laakiin waa la wada wadaagaa.

Sidoo kale, xeer—dhaqameedku waxa uu aqoonsan yahay in beeshu ay wada leedahay dhulka beeraha iyadoo jilib jilib hoose loo kala leeyahay dhulka qaarkii oo aan si fudud loo iibin karahaynin ama loo kirayn karahayn. Dhulka ay beeshu wada leedahay waxaa lagu bixin karaa iyadoo ay wada oggol yihiin dhammaan ragga beesha ku jiraa. Marka la eego dhanka sharciga dawladda, waxa uu dastuurka Somaliland aqbalay in lagu dhaqmo xeerarkii hore iooga dhaqmi jiray Soomaaliya illaa inta la beddelaayo. Dastuurka waxa kale oo ku jira qodobbo ka hadlaaya dhulka waxaana qodobbadaas dastuuriga ah lagu sii faah—faahiyay xeerar. Hase ahaatee marka xeerarkaas la isla akhriyo si fudud looma turjumi karo waxaana jira iska—hor—imaad xeerarka ah. Inta waxa dheer in maadaama aanay kala xadaysnayn dhul beereedka, dhul daaqsinta iyo dhulka magaaloooyinku in awoodaha wasaarada iyo hay'ado dawladeed oo kala duwani ay isku—murugsanyihii arrintan oo abuuraysa dhibaatooyin dheeraad ah oo la xidhiidha dhulka.

Waxa jira, tusaale ahaan, mugdi ku jira awoodda Wasaaradda Hawlaha Guud ee la xidhiidah dhulka magaaloooyinka sida ku qeexan Xeerka Maamulka Magaaloooyinka ee Xeer Lr.17/2001, iyo golayaasha degaanka sida ku qeexan Xeerka Maamulka Gobollada iyo Degmooyinku Xeer Lr. 23/2002. Marka la tixraaco Xeer Lr.17/2001, wasaaradda hawlaha guud waxa ay masuul ka tahay dhammaan dhulka danta guud ee kuu yaal magaaloooyinka iyada oo u samaynaysa qorshaha guud

(master plans) iyo diiwaanka dhulka. Aragti ahaan, qorshaha guud ayaa qeexa dhulka loo asteyay danta guud hayeeshee waxa jira dhul badan oo aan lahayn qorshe guud. Intaa waxa dheer in Xeer Lr.23/2002 uu golayaasha degaanka awood u siinayo kormeerka iyo ka warbixinta bixinta, diiwaangalinta iyo kalaxadaynta, iyo xallinta khilaafaadka dhulka. Sidoo kale waxa uu xeerku awood u siinaya golayaasha degaanka awoodda siinta dhul la siinayo, muwaadiniinta, shirkadaha, ururada maxalliga ah iyo hay'adaha dawladda.

Arrinta tan ka dhibka badan ayaa ah, maamulka iyo maaraynta ka faa'iidaysiga dhulka miyiga ah ha ahaato dhanka xeerkaka la dhaqan galiyo iyo fullinta maamulka. Xeerka Lahaanshaha Dhulka Beeraha, Xeer Lr. 8/1999 ayaa ah xeerkaka kali ah ee la xidhiidha dhulka miyiga. Sidaas oo ay tahay, xeerkani ma qeexo waxa loola jeedo dhul—daaqsimed iyo sida loo maamulayo lahaanshihiisa maadaama arrintan ay maamusho wasaaradda deegaanku Sidaa awgeed, lahaanshaha dhulka iyo xaqa ka faa'iidaysi ee daaqsatada laguma damaanad qaadin sharciga dhexdiisa. Arrintani waxa ay ka dhigtay daaqsatada qaar u nuqul dhul—boob ay kula kacaan beeratalaydu, reer magaalku iyo dadyaw kalaba. Waxa kale oo jira in dokumentiyada la xidhiidha xuquuqaha dhulku aan laga heli karin xafiis u gaar ah.

Waxa jira in daneeyaaasha arimaha dhulku ay dareensanyihiiin jiritaanka baahi loo qabo siyaasad dhul oo dhammaystiran. Tani waxa ay u baahantahay dib—u—eegis lagu sameeyo xeerkaka taabanaya hellida, lahaanshaha, iyo maamulka dhulka iyo samaynt qorshe sharci oo isku—dubba ridan, oo joogtaynaya waxyaaba ah ku wanaagsanyihiiin xeerkaka hadda jira, meesha ka saaraya iska—hor—imaadka, burinayana xeerkaka aan shaqaynayn sidoo kalen buuxinaya gol—daloolooyinka jira.

1.2.3 Maamulka iyo Maaraynta Dhulka

Somaliland kama jirto hay'ad keliya oo ku shaqo leh awood gaar ahna loo siiyay in ay maamusho dhulka qaranka oo dhan oo ay soo saarto noocyada kala duwan ee dhulka. Nidaamka imaka jiraa waa wasaarado iyo hay'ado kala duwan oo ay mid waliba door ku leedahay arrimaha dhulka ee iyada hoos yimaadda. Guud ahaan Wasaaradda Beeruhu waxa ay maamushaa arrimaha dhulka beeraha iyadoo ay Wasaaradda Deegaankuna dusha kala socoto dhulka reer guuraaga iyadoo la kaashanaysa Wasaaradaha Biyaha, Macdanta iyo Xannaanada Xoolaha. Wasaaradda Deegaanka waxa kale oo ay awood u leedahay dhawrista deegaanka.

Jiritaan la'aanta qaab—dhismeed cad oo kala xadaynaaya hay'adaha ku shaqada leh maamulka dhulku waxa ay caqabad ku tahay horu—marka dalka iyo isticmaalka dhulka Somaliland. Kala---xadayn la'aanta awoodaha iyo waajibaadka wasaaradaha ku shaqada leh maamulka dhulku waxa ay saamayn taban ku yeelanaysaa in si wanaagsan loo qorsheeyo maamulka dhulka.

1.2.4 Muranada, iska—hor—imaadka dhulka iyo Maarayntooda

Muranada iyo khilaafka dhulku waxa ay ahaayeen arrimo waligoodba taagan marka la eego taariikhda Somaliland. Tabashooyin soo jireen ah oo la xidhiidha daaqa iyo hantida, magaalayn si xawli ah u socota, fidinta beeraha, ceshiimooyinka laga samaystay dhul—daaqsimedkii, xuduudaha lagu muransanyahay, baadhidda macdanta, iyo qiimo dallaca dhulka ee aan xeerka waafaqsanyn, ayaa ka mid ah qodobada keenaya khilaafaadka dhulka ee hadda jira. Siyaasaddani waxa ay qeexaysaa lix nooc oo ah khilaafaadkan.

1.2.4.1 Khilaafka Maamulka

Waxaa jira is barkanaan iyo iska hor—imaad ku saabsan maamulka iyo gacan ku haynta dhulka ee dawladda jarjanjarooyinkeeda kala duwan sida heer Qaran, gobol iyo dawladaha hoose oo dhinac ah iyo reeraha deegaanka wada deggan oo dhinac ah. Nidaamka maamul daadejinta ee Somaliland waxa uu awood badan siiyay maamullada heer degmo Kala xadayn la'aanta gobollada iyo degmooyinku waxa ay abuuray in loollan uu u dhaxeeyo gobollada iyo degmooyinka dhexdooda waxaana dhacday in iska— hor—imaad hubaysani mararka qaar uu dhaco oo ku saabsan gacan ku haynta meelaha lagu muransan yahay.

Gol—dalooloooyinka ka jira nidaamka gaarsoorka ayaa keeni kara isku—hor—imaad dhanka dhulka ah. Nidaam sharci oo ku guuldaraysta in uu go'aamiyo taariikhda lahanshaha dhul ayaa u nugul in ay dad ka faa'iidaynsanayaa aya sameeyaan sheegasho hanti oo been ah ama isku dayaan in ay wax ka badalaan xuduudaha hanti(dhul) leedahay. Arrintani waxa ay ka dhalatay jiritaanka nidaam maamulka dhulka ah oo tabar daran oo la sharchiyeeyay iyada oo ay isku bahaysteen daneeyayaal kala duwan oo ay ku jiraan siyaasiyiin, madaxda dawalahadada hoose, garsoorayaal, nootaayooyinka, dillaalada dhulka, iyo kuwo kale oo dhammaanka faa'iidaysta nidaamkan dhulka.

1.2.4.2 Khilaafka Dhulka Gaarka Loo Leeyahay

Waxaa jira laba nooc oo khilaafka dhulka gaarka loo leeyahay ah. Nooca hore waa khilaaf ku saabsan lahaanshaha dhulka iyadoo laba ama dhawr qof ay ku murmaan lahaanshaha baloodh

Nooca labaad ee muranka dhulku waa xuduudda laba dhul u dhaxaysa oo isa soo gala ama aan la kala xadayn. Muranka dhulka ee hal baloodh oo isku mid ahi way ka jirtaa magaaloooyinka iyo miyigaba, gaar ahaan dhulkii aan cidi lahayn ama aan waxba laga qaban dagaalka ka hor.

Muranka xuduudda u dhaxaysa laba goobood ayaa ka xoog badan muranka dhulka ama balood dhan, waayo waxaa laga yaabaa in dadweynuhu ay garan karaan cidda iska leh hal baloodh oo dhul ah balse aanay si cad u kala qeexin halka xuduudda baloodhkaas iyo midka ku dhejisani ay tahay. Waxaa iyaguna jira muranno dhul oo la xidhiidha dhaxal ama furriin (burbur) qoys.

Murannada dhulka ee dhaxalka la xidhiidhaa waxa ay dhacaan marka mid dhaxleyaasha ka mid ahi uu keliglii dhul iibiyio iyadoo aanay dadkii kale ee dhaxalka la lahaa ogayn. Arrintaasi waxa ay abuurtaa muran sharci iyo khilaaf. Inkastoo ay Shareecada Islaamku si hufan u caddaysay sida dhaxalka loo qaybsanaayo iyadoo haweenku ay leeyihii ragga badhkii ayaa haddana nidaamka Xeer--dhaqameedku aanu tixgelinin xuquuqda haweenka ee dhaxalka.

1.2.4.3 Khilaafka ku saabsan Khayraadka

Waxaa jira arrimo badan oo sababa khilaafka. Arrimahaas waxaa ka mid ah biyaha iyo doorka ay ugu jiraan reer guuraaga ama xoolo dhaqatada iyadoo uu khilaaf wayni ka dhasho in la wadaago biyaha. Waxaa helitaankii biyaha yareeyay waxyeelooyinka loo gaysto deegaanka, abaaraha iyo ceshiimooyinka la xidhaayo oo hoos u dhigay daqsinta iyo biyaha. Xidhiidhka beelaha kala duwan ee isticmaalka biyuhu waxa uu had iyo jeer ahaa arrin dhalisa khilaaf wayn iyo colaado taariikhi ah.

Biyaha oo noqday hanti gaar ahaaneed iyo shay laga ganancsado gaar ahaan meelaha biyuhu ku badan yihiin ee magaaloooyinka u dhow ayaa waxa ay saamayn ku yeelatay xuquuqdii helitaanka biyaha. Wuxaanay dhalisay khilaaf ba'an iyo loollan ka yimaadda dhinaca reer guuraaga iyo beeralayda oo labaduba baahi weyn u qaba in ay helaan biyo ku filan.

Sidoo kale, waxa khilaafku uu ka dhashaa deegaanada loo malaynaayo in uu ku jiro shidaal ama macdan. Inkastoo ay dawladdu u arkaysay il—dhaqaale oo dhaqaalahu guud ee dalka wax ka tari karta haddana waxaa xiisad abuurtay sida loo maamulay heshiisyada iyo hawl—galka shaqo ee sahaminta shidaalka iyo macdan qodista.

Waxaa laga yaabaa in sababta ugu way nee dhalisa in la isku khilaafu laguna murmo isticmaalka khayraadku ay tahay isbeddelka iyo nabaadguurka ku dhacay deegaanka iyo iyadoo six un loo isticmaalo deegaanka. Doorka ay dawladdu ku leedahay in la xalliyu khilaafka ka dhasha isticmaalka khayraadka kala duwan iyo in ay dawladdu si siman u qaybiso khayraadka ayaa ah mid muhiim u ah xallinta khilaafaadka iyo xafiiltanka Korodhka dadka iyo isbadalka deegaanka, gaar ahaan abaarahaa isasoo taraya iyo xaalufka dhulka ayaa keenay isbadal ku yimi dhaqaalahaa iyo adeegsiga dhulka sida ka tagida noloshii reer guuraaga iyo dhiirri galinta ceshiimooyin laga samaysto dhul—daaqsimeedkii iyo sidoo kale magaalayn xawli ku socota.

1.2.4.4 Khilaafka Dhulka Daaqsinta

Ceshiimooyinka iyo xidhistaa la xidhaayo dhulka la wada leeyahay oo gaar loo xidhaa waxa ay beddeshay sidii ay bulshadu u arkaysay dhulka waxaanay arrintaasi sababtaa khilaaf ba'an. Isbeddelka ku yimid hab—dhaqankii wada lahaanshaha dhulka iyo saamaynta ay ku yeelatay xidhiidhkii bulshadu waxa ay abuuray hirdan u dhaxeeya xuquuqda shakhsiga iyo xuquuqda bulshada ee guud. Bulshadu daaqsatada ahi aad ayay uga soo horjeeddaa in dhulka beero looxidho maxaa yeelay waxa ay halis ku tahay hab—nololeedkoodii arrintan oo wax yeelaysa hayaanka xoolaha iyada oo meelaha qaarna daaqsatada ka horjoogsta dhul—daaqsimeedka. Ceshiimooyinka loo samaysto adeegsi aan wax soo saar lahayn oo kaliya loo adeegsado bangi ahaan ayaa loo arkaa isku day xun oo lagaga faa'iidaysanayo deegaanka. Ceshiimooyinka loo xidho ayaa loo arkaa qaar loo samaystay in laga helo faa'iido qofeed oo lid ku ah tan bulshada.

Abuurista deegaamaynta iyo tuuloooyinka cusub ayaa hadda aad ugu soo kordhaaya Somaliland iyadoo aanay jirin qorshe dawladeed oo lagu sameeyay. Dhinaca siyaasadda, qabaa'ilku waxa ay abuuraan tuuloooyin cusub si ay u xoojiyaan awoodda siyaasadeed ee reerka una ballaadhiyaan deegaanka uu reerku leeyahay. Degsiimooyinka cusubi waxa ay sababaan iska---hor—imaad maaddaama cid gaar ahi ay gooni u sheeganayso daaqsinta iyo biyaha goobtaas iyagoo ka sheeganaaya dadkii kale ee la wadaagi jiray ama ay si guud u wada lahaayeen. Waxa kale oo jira in haddii daaqsintu ku badato meelo kooban ay keeni karto nabaadguur iyo xaaluf deegaan arrintaas oo keeni karta khilaaf u dhaxeeya bulshooyinka ku qasban in ay wadaagaan khayraadka sii yaraanaya.

1. 2.4.5 Khilaafka Dhulka Danta Guud

Dhulka danta guud waxa loo qaybin karaa saddex nooc kuwaas oo kala ah dawladda oo dhulka u qoondaysa in loo isticmaalo danaha dawladda ee guud; dhulka danta guud oo la boobo; iyo in lagu loollamo sidii goob dan guud ah loo heli lahaa. In meelaha danta guud ah le dego oo xoog lagu haysto waxa ay dhacday dagaaladii sokeeye ka bacdi. Meelaha magaaloooyinka ah waddooyin badan oo la dhisay waxaa la degay markii ay dawladdii bur— burtay. Arrintani waxa ay sababtay in aan qorshaha magaalada si fiican loo samayn Karin, waxa ay jartay jidkii loo maraayay goobaha caafimaadka iyo Booliska, waxaanay dhulka qaar gayaysiisay in la waayo meel loo maro maaddaama waddadii laga degay. Dawladdu waxa ay rabtaa in ay gacmaha ka laabato in dhulkii danta guud ahaa ay dib u sheegato. Halkii ay ka iibsan lahayd dhul waxa ay dawladdu raadisa in loogu deeqo ama waxa ay dhul ka doonataa meelaha fog—fog marka ay fulinayso mashruuc muhiim ah.

Mararka qaar, isku dayga in dib loo soo cesho dhulka danta guud waxaa ka dhasha isku dhac ku yimaadda xooggaga nabadvilyada iyo kaabbe abaa'il hubaysan. Dadku waxa ay aaminsan yihiin in dhulka danta guud ee laga kicinaayo loo isticmaalayo dano gaar ah waxaana dawladda lagu eedeeyaa in ay dhulka danta guud ah ay sii iibiso ama shakhsiyad gaar ah la siiyo.

1. 2.4.6 Khilaafka dhulka ee uu sababo maalgashigu

Waxa uu khilaaf ama muran dhulka ahi ka dhashaa dhulka loo qoondeeyay maaigashiga iyadoo dadka diidani ay ka cabsi qabaan in dhulkooda qabiil kale la siinaayo iyadoo lagu marmarsoonaayo maalgashi. Bulshada deegaankaa ka soo jeedaa waxa ay u arkaan in xuquuqdii lahaansho ee ay dhulkooda ku lahaayeen ay waayayaan. Xaaladaha dhulka la siiyay maalgashadeyaasha waxa murankuuu u dhaxeeyaa maalgashadaha iyo dadka kale ee ku lugta leh. Dhibaatooyinka ugu wayni waa iyadooan lala tashan bulshada deegaanka marka dhulka la siinayo maalgashadeyaasha iyo iyadoo aan waxfaa'iido ah lagu celinin bulshada. Sidoo kale, mashaariicda maalgelintu waxa ay abuuraan khilaaf ku saabsan saamaynta ay deegaanka ku yeelanayan, gaar ahaan sahaminta shidaalka oo ay dadku u arkaan in dhulka xoog lagu qaadanaayo. Waxaa lagu murmaa dhulka loo arko in dan guud loo bixin doono si looga helo magdhow dawiadda marka dadka laga kiciyo.

Isabadalkii uu wakhtigii dagaalku ku keenay nolosha daaqsatada, oo ay ku lammaantahay awood la'aanta dhaqaalaha miyigu in uu la jaangaado korodhka dadka ayaa huriyay yagleelidda

magaalooyin. Sidaa awgeedna waxa kor u kacay xaddiga adeegsiga dhulka magaalooyinka iyada la ootay dhulka soo xiga miyiga iyada oo la filayo in muqtaqbalk loo soo fido. Arintani waxa ay qayb ka tahay isbadalka guud ee la xidhiidha lahaanshiyaha gaar ah ee sii kordhaya ee khayraadka dabiiciga ah oo ay ku jiraan biyaha, dhirta, buuraha, dooxyada iyo qaybaha kale ee dhulka. Xakamayn la'aanta kala iibsga dhulka oo ay ku lammaantahay isbadalka tirada dadka iyo dhaqaaluhu ayaa keenay isbadal wayn oo ku yimid baahida loo qabo dhul arrintaasi oo hurinaysa qiime buunbuunin iyo khilaaf sii kordha.

Xaaladaha dhaqaale ee isbadalaya waxa ay abuureen sinnaan la'aan bulsho iyo mid dhaqaale kaas oo si toos ah iyo si dadbanba u saameeyay khilaafka dhulka. Ka ganacsiga ayaa dhulkii ka dhigay mid aanay awoodi karin muwaadiniin badan oo sidoo kalena kordhiyay dhulka ay sheegtaan dadka leh hanti, saamayn siyaasadeed ama taageero reereed. Dhulka magaalooyinka, dhulbadan ayaa gacanta u galay tiro yar oo ah muwadiniinta hanti haysta iyada oo ay dhanka kale soo kordhayaan dadka aan dhulka Lahayn.

Isbadalka dhanka tirada dadka ayaa keentay in tiro badan oo soo galooti sabool reer miyi ahi nolol u soo raadsanayaan magaalooyinka arrintaas oo iyana kor u qaaday tirada dadkaa aan haysan dhul. Sinnaan la'aanta kor ku xusan waxa ay abuuray xaalado iyo dhiirrigalin la xidhiidha khilaafka dhulka gaar ahaan kuwo la xidhiidha sheegashoooin iska—hor --imanaya iyo isku—qabsi xuduudaha ah. Sinaan la'aanta bulshadu waxa ay y sababtaa khilaaf iyo dhibaatooyin kale oo khilaafku sii abuurayo. Isku—hallayn—la'aanta lahaanshaha dhulka ee haysata haweenka, dhallinyarada iyo dadka laga tirada badan yahay ayaa u suuro galisay dadka awoodda leh in ay adeegsadaan awood si ay uga hor—istaagaan dadkaasi xaqooda ay dhulka u leeyiniin amaba kala wareega dhulkooda arrintaas oo sii xoojia takooridooda.

1.2.4.7 Habka xallinta khilaafaadka iyo Hay'adaha ku shaqada leh

Waxaa jira dhawr hay'adood oo ku shaqo leh xallinta khilaafaadka. Waana kuwan hoos ku xusan:

Hoggaan dhaqameedka: Hoggaamiye dhaqameedku door wayn ayay ka qaataan xallinta khilaafaadka dhulka ka dhasha gartana waa loola tagaa. Waxa ay mujtamaca ku dhex leeyihiiin awood ballaadhan iyo mas'uuliyad weyn iyagoo door ku leh xallinta khilaafaadka dhulka. Doorka hoggaamiye dhaqameedku waa mid sii jiri doona maaddaama Somaliland gudaheeda aad looga qaddariyo. Dhinaca reer guuraaga, hoggamiye dhaqameedku waxa ay door ku leeyihiiin

xallintakhilaafaaadka ka dhasha daaqsinta, dejinta colaadaha iyo bixinta magdhowga ka dhasha qoontaama dhaawaca laba dhinac ay isu gaystaan. Hasa yeeshay wax kaqabashadooda arimahan waxasaamayn ku leh arigtida bulshada ka haysato dhexdhedaadnimadooda iyo musuqmaasuqa.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah in ay wada shaqeeyaan hay'adaha dawiadda iyo booliska si loo fuliyo go'aammada, in la helo caddayn qoraal ah oo sax ah oo lagu burin karo sheegashada qabiilka. Doorka duqaydu iyo waayeelku ay ku leeyihii muranka dhulku waa mid iska hor---imanaaya marka dhinac laga eego, markaa waxa loo baahan yahay in la caddeeyo doorkooda.

Hoggaamiyeyaasha Diinta iyo Xafiisyada Shareecada: Arrimaha diinta iyo qiyamka suubbani waxa ay dadweynaha Somaliland ku leeyihii saamayn wayn, waxaana loo arkaa in ay daawo u yihiin xanuunnada bulshada ee ay ka midka yihiin cirweynida, maamul xumada deegaanka iyo caddaalad darrada lagu hayo dadka jilicsan sida haweenka iyo dadka saboolka ah. Xafiisyada Shareecada waxaa loo arkaa in ay caddaalad ka garnaqaan balse waxa ay ku kooban yihiin murannada dhulka ee ka dhaca qoysaska dhexdooda.

Dawladaha hoose: Inkastoo xildhibaannada goleyaasha deegaanka la doortay una dhaw yihiin bulshada gacantana ku hayaan arrimaha maamulka dhulka, haddana waxaa doorkoodii wiiqay xil—gudasho la'aan iyo iyagoo ku milmay arrimaha dhulka. Xallinta khilaafaaadka dhulka iyo hirgalintisu ma hano—qaadi karto haddii aanay ka qayb—qaadan oo aanay oggolayn dawladaha hoose. Si ay waxku ool u noqoto, waxaa loo baahanyaa in dib—u—habayn lagu sameeyo hay'adaha lana xakameeyo awoodahooga la xidhiidha maamulka dhulka.

Nidaamka garsoorka: maxkamaduhu waa kuwa loogu dhaliisha badan yahay marka laga hadlaayo arrimaha muranka dhulka maaddaama la sheegay in ay dhinac u xagliyaan oo ay fuliyaan danaha tujaarta iyo dadka awoodda leh. Sidoo kale, garsoorku hay'ad ahaan uma dhisna kharashka ku baxaana wuu badan yahay. Waxaa la abuuray Guddida Ka—garnaqa Dhulka si loodaaweyyo khliaafka dhulka, haseyeeshee maxkamaduhu weli waxa ay ku leeyihii door waxyaalaha ka baxsan awoodda Guddida sida (muranka beeraha iyo fal—dambiyeedka ka dhasha dhulka). Waxaa lama huraan ah in dib—u—habayn lagu sameeyo ka—garnaqa dhulka si loo helo nidaam caddaalad ku dhisan, Sharciga dadka la ogaysiyo islamarkaana dacwadaha loo dedejiyo.

Guddida Ka—garnaqa Dhulka: Inkastoo aan hadda si sax ah loo qiimayn karahaynin muhiimaddooda iyo waxtarka ay leeyihiin, haddana Guddidu waxa ay ku dhaqantaa cagajiid maamul waxaana jira iska—hor—imaad dhex maraha hay'adaha kale ee dawladda ee caddaaladooda laga cabanaayo. Waxaa hubaal ah in ay weli haystaan fursad ah in ay noqon karaan hay'ad dhexe (oo isku dhafan) oo buuxisa galdaloolooyinka hay'adaha caddaaladda ee kale iyadoo meesha laga saraayo in dadku ay hadba door bidaan hay'adda ay is leeyihiin dantiinaan ka heli kartaan (forum shopping). Guddida weli waa laga dhur sugayaa in ay kaalintaas buuxin karaan.

1.2.5 Isticmaalka Dhulka Miyiga iyo llaalinta Deegaanka

Dhulka Somaliland waxa ku socd xaaluf ay keeneen qodobo kala duwan oo ya ka mid yihiin isbaddal ku yimidday dhanka adeegsiga dhulka, culays ka dhashay korodhka dadka, jaridda dhirta iyo socodkii dadka daaqsatada ah oo yaraaday. Sidaa awgeed waxa jira baahi dhakhso ah oo loo qabo in la dhiirigaliyo maaraynta dhulka ee waarta oo ay ku jирто ilaalinta dhulka lawada daaquo, kayamaha kaydka ah iyo dhulka duur—joogtu ku nooshahay haddii la rabo in aan dhulka khayraadkiisa la sii wiiqin. Qorshaynta ka—faa'iidaysiga dhulka ee heer qaran iyo mid bulshoba waxa ay lagama maarmaan u tahay dhiirri galinta go'aan midaysan oo laga gaadho adeegsiga dhulka ee mustaqbalka waxa kale oo ay sal u noqonaysaa xoojinta maaraynta dhulka.

1.2.6 Arrimaha Dhulka Danta Guud

Lahaanshaha dhulka danta guud lagu caddayn siyaasad iyo Xeer kale toona marka laga reebo qdobka dastuuriga ah ee ka hadlaaya. Inkasta oo qdobka 2.2 ee dastuurku uu tilmaamayaa doorka ay dawladdu ku leedahay maamulka hantida danta guud. Qdobku ma qeexaayo waxa looga jeedo dhulka danta guud manuu cayimin hay'ad dawladeed oo ka mas'uul ah maamulka iyo maaraynta dhulka. Ma jiro diiwaan dawladeed ee koobaaya dhulka ay dawladdu leedahay ama lagu diiwaangeliyo. Mana cadda nidaam tilmaamaya sida ay dawladdu u qaybinayso dhulka danta guud ee ay u siinayso dad gaar ah ama ganacsi loogaga faa'iidaysan karo.

1.2.7 Arrimaha Dhulka Magaaloooyinka

a) Firidhsanaanta Magaalada

Waxaa jira firidhsanaan ay magaaloooyinku u fidayaan si firidh ah (marka laga reebo dhawr degmo) maaddaama aanay jirin qorshayn fiicanii Wasaaradda Hawlaha Guudna aanay lahayn karti ay ku samayso qorshayn qaran oo dhulka ah. Firidhsanaanta magaaloooyinku waxa ay ka muuqdaan

magaalooyinka qaar iyadoo aad arkaysid in ay magaaladu u fidday si aan isu dheeli— tirnayn oo ka fog xarunta dhexe. Sababta kale ee firidhsanaanta magaalooyinku waxa weeye iyadoo ay degmooyinku korayaan inkastoo Qodobka 3aad ee Xeerka Maamulka Dhulku uu tilmaamayo in ay magaaladu u fidi karto 5 kilomitir laga bilaabo xundhurta magaalada. Arrintaasi waxa ay keenaysaa in la qaaliyeeyo dhulka magaalada ka baxsan. Firidhsanaanta magaalyooyinku waxa ay ka soo hor—jeeddaa Xeer Lr. 17 dhowr sababood awgood.

Marka koowaad, baloodhada magaalada ka baxsan waxaa lagu qayday bilaa qorshe. Mar labaadka, qodobkii ah in 30% loo qoondeeyo danta guud waa lagu xad—gudbay oo laguma dhaqmo. Dhulka danta guudna waxaa looga jeeday in laga sameeyo adeegyada aasaasiga ah oo ay kujiraan waddooyinku. Marka saddexaad, baloodhada laguma samayn hab—dhaqan fiican oo waafaqsan qorshaha magaalooyinka laguma samayn. Marka afraad, waxaa jira baloodho la bixiyay laakiin aan waxba laga qaban laba sano ka dib am aka badan taasoo ka hor imanaysa Qodobka 17aad ee Xeer Lr. 17 oo dhigaaya: "In uu dhismaha bilaabo wakhtiga loo qabtey oo ku cad warqadda jago bixinta".

libinta ama bixinta dhulka danta guud, jiritaanka dhul ballaadhan oo aan la manaafacaadsan, ka ganacsiga dhulka iyo qaaliyaynta dhulka, iyadoo aany jirin maamulka dhulka oo hanaqaad ah, faqiirnimada, iyo magaalayntii oo sii kordhaysa aya sabab u ah in ay jiraan dad badan oo bilaa dhul ahi. Dhul la'aanta ku habsatay dad badan oo bulshada ahi waxa ay sababtay in la'abuuro degsiimooyin aan shard ama rasmi ahayn oo laga yagleelo dhulka danta guud ama dhul gaar loo leelahay. Saamaynta ay yeelanayso Degsiimooyinka aan la qorshaynin waxa ay saamayn ku yeelanayaan deegaanka, caafimaadka iyo arrimaha bulshada, habacsanaan, isticmaalka dhulka oo aan la xakamayn, beerolayda oo lagu xad—gudbo iyo nabaadguur deegaanka ku dhaca.

b) Cashuurta dhulka iyo hantida

Maaddaama aanay jirin xuduud cad oo kala xadaysa gobollada iyo degmooyinku, awoodihii wasaaraduhuna isasoo gelayaan, oo aanay jirin hab lagu maamulo diiwangeiinta dhulka iyo shahaadadaha dhulka ay dawladaha hoose soo saaraan, aan la cashuurin dhulka aan waxba laga qaban (ee la seesay uun), aanay jirin diiwaan dhexe oo iagu kaydiyo dhulka, iyo iyadoo la isticmaalayo diiwaangelinta hantida oo qadiim ah ayaa waxa ay dhammaantood saamayn ku leyihii cashuurta hantida iyo ururinteeda.

1.2.8 Suuqyada kala iibsiga dhulka iyo maalgashiga dhulka

Dawladdu illaa hadda may samaynin nidaam lagu xakameeyo suuqa kala iibsiga dhulka. Arrintaasi waxa ay fursad u siinaysaa dadka ka ganacsada dhulka in ay siday doonaan u qiimeeyaan oo ay qaaliiyeeyaan; dhulkii oo aan waxba laga qaban ama aan la maanafacaadsan. Dadku waxa ay iibsadaan dhul aad u ballaadhan oo ka baxsan magaalada taas oo ka hor jeedda Qodobka 3aad ee Xeer Lr. 17 oo xadaynaaya in magaaladu ay 5km dhinacyada u fidi karto. Suuqa marka aan la xakamayn waxa uu keenaa in qiimuhu aad kor ugu kaco, dhulka sida sixir bararka ah loo qiimeeyayna waxa ay keenaysaa in aan dhulba la helin maddaama uu qiimuhu sarreeyo. Taas oo weliba aad ugu adag dadka fuqarada ah.

Qodobka 31aad, faqraddiisa 2aad ee dastuurku waxa ay dhigaysaa in magdhow ku habboon laga bixiyo marka dhul ay dad gaar ahi leeyihii loola wareego dan guud e maalgashi loo bixinaayo. Haseyeeshee ma jiro habraac caddaynaaya sida lagu bixinaayo magdhowga iyo habka looqiiimaynaayo. Marka dhul la bixiyo ee la siiyo maalgashadeyaal bulshada deegaanka laguma war—geliyo faa'iidata ku jirta ee uu mal—gashaduhu u keenayo dalka iyo deegaankaba. Mana cadda waxtarka ay yeelanayso dhulka maalgelinta loo bxiyay ee ay hadda dawladdu si gaar ah u bixisay. Mana jirto hay'ad dawladeed oo ka wakiil ah dadweynaha deegaanka dhulkoodii la bixiyay.

Maqnaanshaha hab sharci ama hay'ad maamusha dhulka Somaliland, waxa ay carqalad iyo hagar--daamo ku tahay horumarka Somaliland. Wuxuu kale oo ay kordhinaysaa niyad—jab taariikkhi ah iyo iyadoo uu dhulkii si aan kaantarool lahayn ugu fidaayo dhul daaqsimedka ah; ceshiimooyinka sharci darrada ah; muliyadda oo laba goor si musuqmaasuq ah loo bixiyo; qiimaha dhulka oo la qaaliyeeyo; iyo nabaadguurka dhulka iyo xaalufintiisa. Inkastoo Somaliland ay nabad ahayd laga soo bilaabo 1991 nidaam dawladeedna ka jiray haddana dhinaca dhulka waxaa weli ka muuqda doogtii dagaallada. waxaana la sameeyay Xeer Lr. 17 (Maamulka Dhulka Magaalooyinka, 2008) iyo Xeer Lr. 23 (Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka). Balse ma jirto siyaasad guud oo ku waajahan dhulku waxaana jira su'aalo muhiim ah oo aan illaa hadda laga jawaabin kuwaas oo ah dhulka iyo dawladda, dhulka gaarka loo leeyahay iyo mulkiyadda (lahaanshaha); wadajirka xeerarka kala duwan (Xeer—dhaqameedka, Shareecadaiyo Xeerarka dawladda); hay'adaha ku shaqada leh iyo habraaca loo maraayo xallinta khilaafaadka intuba ma kala qeexna. Waxaa jira dacwado dhul oo aad u badan oo aan illaa hadda wax xal ah laga gaadhin.

Dhulka miyiga waxaa dhibaato wayn ku haya ceshiimooyinka oo saamayn ku yeeshay noloshii reer guuraaga iyo xuquuqdii daaqsinta ee xoolo dhaqatada. Sidoo kale dhul beereedkii iyo beerihii ay dawladdu lahaan jirtay waa lala wareegay iyadoo aan loo raacin nidaam sharci. Ugu dambaynna awoodda sharci fulintu ma xooggana. Dawladdu waa ay ka dhoregsan tahay isbeddellada ka dhacaaya Somaliland haseyeeshee weli ma aygaadhin xal kama dambays ah oo lagu daweyyo dhibaatooyinka jira. Waxaa markaa lama huraan ah inla helo siyaasadda qaran ee dhulka Somaliland, dib—u—habayn lagu sameeyo Xeerarka iyo hay'adahadawladda eek u shaqada leh dhulka islamarkaana la xalliyu khilaafka iyo muranka dhulka.

2. CUTUBKA 2AAD: QAABDHISMEEDKA SIYAASADDA QARANKA EE

2.1 DHULKA HIMILADA SIYAASADDA

In la helo bulsho xasiloon oo barwaaqo ku jirta lehna nidaam dhulka lagu maamulo oo damaanadqaadaya in dhulka loo wada sinaado isla markaana degaanka la ilaaliyo si loo gaadho horumar bulshooyo mid dhaqaale si wax ku ool lehna u maareeya khilaafka la xidhiidha dhulka iyo khayraadka"

2.2 HADAFKA SIYAASADDA QARAN EE DHULKA

Hadafka siyaasadda qaran ee dhulku waa in la hubiyo cadaalad, isticmaal fiican iyo maamulkakhayraadka dhulka Somaliland iyo horumaar dhaqaale

2.3 UJEEDOOYINKA SIYAASADDA QARANKA DHULKA

In la hubiyo u sinaanta iyo damaanadda helitaanka dhulka ee dadka oo dhanin la is waafajiyo lana fududeeyo shuruucda dhulka ee ad—adag isna khilaafsan ee haddalagu maamulo dhulka si loo hubiyo joogtaynta maamulka iyo ilaalinta khayraadka dhulkasi loo hubiyo helitaanka nidaam xalin khilaafeed oo caddaalad ah, wax ku ool ah, laawoodi karo lana heli karo waqtiga ku haboon.

In la is waafajiyo shuruucda iyo xeerarka la laxidhiidha dhulka lana sameeyo xeer qaran(act) oo dhulka ah oo mideeya qaab— dhismeedka maamulka iyo maaraynta dhulka.In dib loo habeeyo lana fududeeyo maamulka xuquuqda dhulka si loo hubiyo adeeg dhulqaybin (delivery) oo karti leh, wax—ku—ool ah isla markaana loo siman yahay.In la hubiyo wax soo saarka iyo joogtaynta isticmaalka kheyraadka dhulka ee wadanka siloo dhiiri geliyo hormumar dhaqaale iyo mid bulsho oo deg—deg ah.

2.4 Mabaadii'da Siyaasadda Dhulka Qaranka

Maamul lahaanshiyo dhul oo laysku halayn karo (responsible) Aqoonisi sharci iyo ilaalinta dhammaan xuquuqda lahaanshaha dhulka ee sharciga ahU sinnaanta helida cadaalad la xidhiidha xallinta khilaafaadka xuquuqdalahaandhaha dhulka iyo khayraadka. In si siman dhulka loo wada isticmaali karo iyadoo aan loo eegay ama lagu kaia soocaynsinji, qabiil, da'da, ama sabab kale oo taariikhdu alkuntay ama dhaqan iyo caado iyadoo uuqof waliba xaq u leeyahay in uu yeesho, haysto, isticmaalo, ku raaxaysto, manaafacaadsadoama uu horumariyo keligii ama koox ay ku horumariyaan.

Isticmaal dhul oo waxsoosaar iyo joogtayn leh, maamul iyo horumarin khayraadka dhulkaSinaan jinsi iyo takoor la'aan khusaysa lahaanshiyaha iyo helitaanka dhulka dhamaanqaynaha lahaanshiyo eek ala duwanKa qayb qaadasho firfircoo, waxku ool ah, muhiim ah oo ay sameeyaan dhamaandaneeyayaashuIlaalinta iyo maamulid joogta ahoo lagu sameeyo khayraadka dabiiciga ah ee dhulka kujira.

CUTUBKA 3AAD: BAAQYADA SIYAASADDA

3.1 Arrimaha lahaanshiyaha dhulka

Dastuurka iyo siyaasadaha dhulka ee jiraa makala saarayaan/qaybinayaan dhulka Somaliland. Sidookale dastuurka iyo shuruucda dhulka ee jirtaa si cad uguma qeexayaan xuquuqda lahaanshiyo ee dadkuhaystaan qaybaha kala duwan ee lahaanshiyaha, haday noqoto miyi iyo haday noqoto magaaloooyinba. Si gaar ah, waxa aan la qeixin xuquuqda bulshooyinka (communities), qoysaska iyo shakhsiyadka dhulku leh meelaha dadweynuhu leeyahay (communal areas). Inkastoo dhaqaalaha Somaliland uu si balaadhan ugu tiirsan yahay reer—guuraanimada oo si balaadhan u isticmaasha dhulka dadweynuhuwada leeyahay. Si kastaba ha ahaatee, si cad looma qeixin waxa uu yahay dhulka la wada leeyahay,sida loo maamulayo, ama xuquuqda reer guuraagu ku leeyahay dhulkaas.

Sidoo kale, waxaan la kalacadayn sharciyadda xeer dhaqameedka oo ah sharciga aadka loogumaamulo dhulka lawada leeyahay marka laga hadlayo nidaamka lahaanshiyaha dhulka. Waxay umuuqataa inay jiraan baaqyo guud (assertions) oo ku jira shuruucda iyo siyaasadaha kala duwanoo tilmaamaya ka in xeerarku dawladu ka sareeyaan xeer dhaqameedka. Waxa kale oo jira baahi loo qabo in si cad loogu kala saaro siyaasadda iyo sharciga waxa ay kalaayihiiin dhulka

dadweynaha (public land), dawladda (state land), dhulka gaarka loo leeyahay (privateland) iyo dhulka la wada leeyahay ee danta guud.

Qodobka 12(4) ee dastuurku wuxuu sheegayaan in dawladda dhexe masuul ka tahay kheyraadkadalka, isla markaana ay qaadayso talaabo kasta oo lagu sahaminayo laguna isticmaalayokhayraadkaas Ilaalinta iyo habka ugu fiican ee loo ilaalin karo kheyraadkan dabiiciga ah waxago'aamin doona xeer (law). Si waafaqsan qodobka 12(1) ee dastuurka, khayraadka dabiiciga ahwaxay gaar u yihiin dhamaan dadka reer Somaliland waxaana heynaya isla markaana maamulayadawladda lagu aaminay iyadoo eegaysa danta guud ee dadka Somaliland.

3.1 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):

Dhulka Somaliland waxaa loo kala qaaday dhul dadweyne (public land), dhul gaarloo leeyahay iyo dhul bulshadu leedayay (community land). Khayraadka dabiiciga ahi waxa uu gaar u yahay dadka Somaliland oo dhan, waana in sida kuhabboon awood loo siiyaa beelaha, dawaladaha hoose iyo dawladda dhexeba si kor looguqaado ilaalinta iyo joogtaynta ka—faa'iidaysiga khayraadka dhulka. Nidaamka lahaanshiyaha dhulka ee xeer dhaqameedka waxaa loo aqoonsanayaa inuuyahay mid sharci Xuquuqda dhulka waxa yeelan kara qof, qoys ama koox. Dhammaanxuquuqda lahaanshaha dhulka ee qaybaha kala duwan ee lahaanshaha (tenure category) siisku mid ah ayaa loo diiwaangalinayaa.

Aqoonsi sharci ayaa la siin doonaa dhammaan xuquuqaha lahaanshaha dhul ee sharcigaah ee aan hadda sharcigu dhawrin.(ku xusnayn) Istaraatajidaha (strategies): Dawladu waxay samayn doontaa (enact) "xeer dhul" si loogu maamulo qaybaha kala duwanee dhulka waxaanuu xeerku qeexi doona dhulka dadweynaha (public land), dhulkagaarka loo leeyahay iyo bulshadu leedahay (community land) Waa in la dajiyoo sharci dhigaya in dhulka dawladdu ka koobanyahay kaliya xarumahadawladda, khayraadka macdanta, ilaha biyaha dabiiciga ah iyo khayraad kasta oo dabiica ahoo aan xeer—dhaqameed ahaan ama sharci ahaan aanu u lahayn qof, qoys ama beeli

Dawladu waxay dejin doontaa nidaam lagu hubinayo maamul joogto ah ookheyraadka dabiiciga oo mustaqbal si loo gaadho barwaqodawladdau waxa ay hubin doontaa in dhammaan dhulka sida gaarka ah loo leeyahay iyodhulka bulshadu leedahay lagu yeelan karo sharci u hogaaansamaya qasab dib—ugula—soonqoshada ka—faa'iidaysiga dhulkaiyo maamulka horumarinta. in

dawladdu damaanad qaado in aanu jirin faquuq la xidhiidha ka faa'iidaysiga iyo lahaanshaha dhulka qaybahiisa kala duwan. In dawladdu samayso nidaam muuqda oo laxisaabtan leh qaybinta, isticmaalka iyobixinta dhulka danta guud.

Dawladuu waxay ku qorshayn doontaa xeerka dhulka "Land Act" qaabdhismeed iyo habraacyo ay ugu talo gashay: Qeexidda doorka ay shareecada, xeer dhaqameedka iyo xeerarka dawladi ku yeelanayaan lahaanshiyaha dhulka. In shard ahaan loo aqoonsado hay'adaha maamulka dhulka ee buulshada lana xoojiyo hay'adahaas si dhulka loogu maamulo hab dimuqraadi ah oo oo xilkasnimo ah. In la aqoonsado, la ilaaliyo lana diiwaan geliyo xuquuqda bulshadu ku leedahay dhulka iyo khayraadka ku jira iyadoo la tixgelinayo danaha faraha badan ee dhamaan dadka isticmaala dhulka sida dumarka iyo dadka kale ee nugul. In lagu darro nidaamyada dhaqanka habka maamulka iyo xalinta khilaafadka dhulka.

3.2 Arrimo sharci

Is—burinta kujirta shuruucda kala duwan ee wadanka iyo maamulka dhulka ee liita ayaa kamid ah sababaha ugu waaweyn ee dhaliya khilaafka. Waxa kujira nidaamka maamulka dhulka mad--madaw iyo ismaandiid socda oo la xidhiidha awoodda/xaqa, awoodaha is—dhexgala (overlapping) iyo liidasho dhanka maamulka dhulka ah.

3.3 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):

Dawladdu waxay dib u eegi doontaa wax—kabadalna ku sameyn doontaa qdobada dastuurka ee kahadlaya dhulka si loo caddeeyo in dhulka Somaliland dadku wada leeyihiin halka dawladdu iyadoo ay ka maamuli doonto ka faa'iidaysigiisa.

In sharciga lagu caddeeyo in inkasta oo dhulka yahay hanti dadka u dhaxaysa, hadaana xaqa sharci ama dhaqan oo dhulka waxa yeelan kara muwaadiniinta ha ahaadaan qof, qoys ama beel waxana lagu diiwaangalinyaa in ay yihiin hantiilahayaasha si waafaqsan sharciga. Dawladu waxay iswaafajin doontaa shuruucda jirta waxay sameyn doontaa hal sharci oo midaysan oo lagu maamulo dhulka Somaliland Dawladu waxay si cad u sheegi doontaa xadka iyo awoodaha ay kala leeyihiin shareecada, xeer dhaqameedka iyo shuruucda dawladi marka laga hadlayo maamulka lahaanshahadhluka.

3.4 Istaraatajiyadaha (Strategies):

Dawladdu waxay diyaarin doontaa (set out) tiirkanka guud ee lagu maamulayo lahaanshaha dhulka ee dhamaan nidaamyada lahaanshaha dhulka ee kala duwan. Dawladdu waxay dib u eegi doontaa shuruucda dhawrka ah ee taabanaya dhulka iyo sharciga qabyada ah kaasoo is waafajin doona shuruucda hadda jirta ee is—burinaya isna khilaafsan ee la xidhiidha maamulka iyo isticmaalka dhulka.

3.5. Maaraynta iyo maamulka dhulka

Somaliland, maamulka dhulku wuxuu ka dhexeeyaa nidaamka xeerarka dawladda iyo kuwa xeer dhaqameedka. Is—waafajin la'aanta labada nidaam ee jira iyo jiritaan la'aanta hay'ad kaliya oo awood u leh looguna talo galay inay maamusho isla markaana maarayso arimaha dhulka qaranka oo dhan ayaa waxay keentay damaanad la'aanta xuquuqda dhulka, taasoo ka dhalatay maqnaanshiyaha nidaam saxa oo diiwaangelineed, khaladaad kujira habka diiwaangelinta dhulka, khiyaamo iyo foorjari ka yimaada nidaamka maamulka dhulka. Kama jiro Somaliland diiwaan qaran oo dhexe oo dhulku leeyahay.

Awooda diiwaan gelinta dhulka magaaloooyinka waxaa loo dhiibay dawaladaha hoose iyo wasaaradda hawlahaa guud siduu tilmaamayo xeer lambar 17 (urban management law) kaasoo leh goldaloolooyin badan isla markaana aan si buuxda loo fulin. Awooda diiwaan gelinta dhul beereedyada waxaa loo dhiibay wasaaradda beeraha siduu tilmaamayo xeerka lahaanshiya dhul beereedka (xeer lambar 8) kaasoo isna leh gandaloolooyin badan. Hirgelinta xeerjani wuxuu ahaa mid ku dayid ah mararka qaarna six xun loo isticmaalo ayadoo dhulalka qaar loo diiwaangeliyo beero ahaan iyagoo aan ahayn. Wax jirta baahi degdeg ah oo loo qabo in dalka loo samayo diiwaan dhuleed oo mideysan miyiga, magaaloooyinka iyo isticmaalada kala duwanba.

3. 6 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):

Dawladdu waxay samayn doontaa Wasaaradda ama Guddida Qaran ee Dhulka oo noqonaysa awoodda kaliya ee qaabilsan dhamaan arimaha dhulka waxaanay si cad u qeexaysaa awoodaha iyo shaqada wasaaradan. Daadajinta go'aan ka gaadhista iyo adeegyada la xidhiidha dhulka ilaa heer degmo iyo beeleed hadba sida ugu habboon Dawladdu waxay hubinaysaa heerkasta qaab—dhismeedka maamulka iyo maareynta dhulka iyo in habraacyadu (processes) yihiin qaar leh daah—furnaan, la xisaabtan, karti, kharash macquul ah (cost effective), la awoodi karo

(affordable) isla markaana dadweynuhu heli karaan. Dawladdu waxay samayn doonta xeerka diiwaangelinta dhulka (Land Registration Act) si loogu diiwaan geiiyo xuquuqaha dhulka oo dhan qaybaha lahaanshiyaha ee kala duwan Dawladu waxay is—waafajin doontaa nidaamayada xeerarka dawladda iyo xeer dhaqameedka si loo hubiyo maamul dhul oo isku xidhan oo dalku leeyahay.

3.7 Istaraatajiyadaha (strategies):

Dawladdu waa in ay: Samaysaa nimaad qaran oo maamulka dhulka ah iyo hay'ado ku habboon. Hawsha muhiimka ee maamulka dhulku waa: Fulinta hawlo siyaasadeed sharci iyo la socod oo heer dawlad dhexe ah. Go'aaminta iyo diiwaangalinta xaqa lahaanshaha dhulka Bixinta iyo maaraynta dhulka danta guud Fududaynta dhaqdhaqaqyada la xidhiidha dhulka Dejinta iyo ka warhaynta nidaam wanaagsan oo sax ah oo lagu kaydiyo xogta dhulka Yagleelidda hababka xallinta khilaafaadka dhulka oo waxku ool ah lana heli karo Dawladdu waxay si haboon ugu daadejin doontaa shaqada maamulka iyo maarayta dhulka heer gobol, heer degmo iyo heer bulsho Dawaladda waxa aya si cad u qexi doontaa kaalinta iyo mas'uuliyadaha ay leeyihii dhammaan hay'adaha ku shaqada leh maamulka arrimaha lahaanshaha dhulka oo ay ku jiraan hay'adaha dhaqanku Dawladdu waxay kobcin doontaa awoodaha hay'adaha dhulku u leeyihii maamul iyo maarayn wax—ku—ool ah dawaladdu waxa ay aqoonsan doontaa habaynna doontaa nidaamka dhaqanka ee maamulka iyo maaraynta lahaanshaha dhulka si waafaqsan qaunuunka dawladda.

Dawladdu waxay samayn doontaa diiwaan qaran oo loogu talo galay diiwaan gelinta xuquuqaha dhulka ee dhamaan qaybaha lahaanshiyo ee kala duwan kaas oo hoos yimaada wasaaradda Hawlaha Guud oo la gaadhsiin doono heer degmo Dawladdu waxay samayn doontaa nidaam u ogolaanaya dadka dhulka leh iyo kuwa isticmaala gaar ahaan haweenku inay si buuxda uga qayb qaataan dhamaan dhinacyada maamulka xuquuqda dhulka sida qorsheynta, barnaamij u dejinta, hir—gelinta, kor meeridda iyo qiimaynta. Waxay samayneysaa kana shaqeynaysiinaysaa diiwaan dhul oo loogu talo galay diiwaan gelinta iyo cadaynta xuquuqda dhulka oo waafaqsan lahaanshiyaha dhulka xeer dhaqameedka. Dawladdu waxay samayn doontaa kana shaqeynaysiin doontaa qaab lahaanshiyo dhul oo ku salaysan kiro oo ay yeelanayaan dhulka magaaloooyinka iyo beeruhu.

3.8 Muranka Dhulka Iyo Maamulka Xalinta Khilaafaadka Dhulka

Habka loo maamulo khilfaadka dhulka ee jiraa wuxuu ku sifaysan yahay jiritaanka shuruucda kala duwan(legal pluralism). Hogaamiyayaasha dhaqanka, hogaamiyayaasha diinta iyo maxkamadaha shareecada, dawladaha hoose, maxkamadaha sharciga iyo gudiyada khilaafka dhulku (tribunals) waxay isticmaalaan shareecadda iyo xeerarka dawladda siday u kala leeyihiin si'ay u xaliyaan khilaafka iyo muranka dhulka. Hababkan xalinta khilaafaadka dhulku waxay iyaguna ku sifaysan yihiiin maqnaanshiyaha hirgelinta go'aanada dhaqanka, koobnaanta dabaqaadda shareecada, maqnaanshiyaha door cad oo dawlada hoose leedahay, karti darro xagga hay'addaha ah, kharashka oo aad u sareeya iyo sawir khaldan oo dadku ka haysto maxkamadaha dawladda iyo gudiyada khilaafaadka dhulka oo iyagana ay haysato awood darada haysata hay'adaha kale ee dawladda iyo maqnaanshiyaha cid matasha dadka nugul sida dumarka, dadka faqiirkha ah iyo dadka laga tirade badan yahay.

3.9 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):

Dawladdu waxay dib u qexi doontaa awoodaha iyo doorka ay leeyihiin hay'adaha xalinta khilaafaadka dhulka ee jiraa si meesha looga saaro awoodda murugsanaanta (overlaps), gol—daloolooyinka, is—burinta iyo murugga Dawladdu waxay dib u habayn ku samayn doontaa nidaamka xalinta khilaafaadka dhulka si loo hubiyo hab dhakhso ah lana awoodi karo oo loo xaliyo khilaafaadka dawaladdu waxa ay awood shard ah siin doontaa hay'adaha dhaqanka si ay u xaliyaan muranada dhulka ee ka dhaca dhulka bulshadu leedahay.

3.10 Istaraatejiyada (Strategies):

Dawladdu waxay fulin doontaa tafatirid sharci oo dhamays tiran oo lagu sameeyo nidaamyada khilaafaadka dhulka ee jira si meesha looga saaro is dhexgalka (overlaps), loo garto is—burinta iyo gol—daloolooyinka Dawladdu waxay dhisi doontaa awooda sharci iyo ta farsamo ee dhamaan hay'adaha ka shaqeeya xalinta khilaafaadka dhulka haday noqoto dawladda, diinta/shareecadda iyo dhaqanka Dawladdu waxay xoojin doontaa hay'adaha shareecada iyo dhaqanka si loo helo haynta qoraalo wanaagsan oo laga sameeyey khilaafaadka dhul ee ay xaliyeen Dawladdu waxay samayn doontaa shuruuc si adag u reebaysa dhaqanka hadda jira ee dhul boobka waxaanay bilaabaysaa dood qaran oo ku wajahan arrinkaas.

Dawladdu waxay siin doontaa dadka la takooro iyo kuwa nugul adeeg sharci oo bilaash ah Dawladdu waxay dhiiri gelin doontaa nidaamyo kale oo khilaaf xallin (Alternative Dispute resolution) oo heer bulsho ah waxa aanay samayn doonto tilmaamo si loo fududeeyo helitaan cadaaladeed oo deg—deg ah isla markaana kharash yar.

3.11 Maamulidda isticmaalka dhulka baadiyaha (miyiga) iyo ilaalinta degaanka

Balaadhashada ama fiditaanka magaaloooyinka iyo korodhka dhulka dhirtu ku yar tahay (thin tree cover) iyo hoos u dhaca dhulka kaymaha (thick tree cover) 62% boqolkiiba mudadii u dhaxaysay 1986 ilaa 2010—kii ayaa tilmaamaysa dhir jarid muuqata ah iyo sii yaraanta dhirta ee Somaliland. Wuxaan jirin qeexitaan cad oo khuseeya lahaanshiyaha dhulka dawladda iyo dadweynaha/bulshada sidoo kale waxaan jirin ilaalin iyo maamulid joogto ah oo lagu sameeyo dhul daaqsiimedka iyo kaymaha seerayaasha (forest reserves). Saameyn ta xidhashada dhulka ee sharci darada ah, isbedelka cimilada and jiritaan la'aanta qiimeyn lagu sameeyo degaanka oo ku saabsan isticmaalka dhulka baadiyaha ayaa ah mid lawada ogyahay.

3.12 Siyaasadda kuwajahan (Policy statements):

Dawladdu waxay diyaarin doontaa siyaasad isticmaalka dhulka oo cad oo dhamays tiransi'ay u hagto horumarka miyiga iyo magaaloooyinka isla markaana uga hortagto khilaafka isticmaalka dhulka una dhiiri geliso horumar la taaban karo Dawladuu waxay dib—u—habayn ku samayn doontaa shuruucda iyo xeerarka dhaqamaamulka, isticmaalka iyo horumarinta dhulka baadiyaha si ay ula jaanqaadaan hal—beeg(standards) u yaala isticmaal iyo horumar la joogtayn karo Dawladdu waxay maamuli doontaa ilaalin doontaana kheyraadka dabiiciga ah si waafaqsan mabaadii'da danta guud ee muwaadiniinta Somaliland. Dawladdu waxay hubin doontaa in habka isticmaalka dhulka baadiyuhu waafaqsan yahay xeerka dhulka "land Act), mabaadii'da maamulka degaanka, ilaalinta iyo joogtaynta maamulida dhulka miyiga Dawladdu waxay damaanad qaadi doontaa ilaalin doontaana xuquuqda dhulka ee dadka reer guuraaga ah Dawladdu waxay hubin doontaa in khayraadka dhulka loo isticmaalo sida ugu fiican loona maamulo hab joogtayn iyo si wada socota Istaraatajidaha (Strategies).

Dawladda ayaa cadayn doonta shuruudaha iyo xaaladaha hay'adaha la sameeyey u isticmaali doonaan una maamuli doonaan kheyraadka dabiiciga ah Dawladda ayaa socodsii doonta (institutionalize) nidaamka ay u wada maamulayaan una wadaagayaan faa'iidata laga helo

kheyraadka dabiiciga ah dawladda oo ah tii lagu aaminay iyo bulshada oo ah kuwii intifaacsanayey Dawladdu waxay hubineysaa go'aano maalgeshiyo laxaad leh iyo hawgaladu inaanay wax u dhimin maamulid joogto ah iyo ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah Dawladdu waxay samaynaysaa dhiirigelinaysaana shuruuc iyo qaabdhismedd ku haboon maamulida khayraadka dabiiciga ah.

Dawladdu waxay hubin doontaa in dhulka reer—guuraagu in loo haysto, loo leeyahay loona xukumo sida hantida caadiga ah marka la eego xeer dhaqameedka Dawladdu waxay ku celinaysaa adkaynaysaana sharciyadda lahaansho ee bulsho ahaan iyo dhaqan ahaan ku haboon si loo ilaaliyo xaqqa ay u leeyiniin khayraadka loo dhanyahay ee ay ka mid tahay dhabboonyinka xooluhuu ka hayaamaan Dawladdu waxay dib usoo ceshan doontaa 18—kii dhul—daaqsimeed ee hore Dawladdu waxay xeer ugu fasixi doontaa in wasaaradda deegaanku ku dhawaaqdo una aqoonsato dhul halis kujira (hazard lands) dhul cayiman oo la xaalufiyey

3.127 Arrimaha dhulka dawladda (public land management)

Xaaladda lahaanshiyaha dhulka dawladda laguma cadayn siyaasad ama xeer marka laga yimaado qeexitaanka dastuurka ee Qodob 2.2. oo sheegaya kaliya doorka dawladdu ku laadahay dhulka dawladda. Qodobka 2.2. waxa uu kabaqsaday inuu qeexo waxa looga jeedo dhulka dawladda isla markaana si cad ugu magacaabo hay'ad dawladda dhexe ah oo masuul ka noqota maamulka iyo maaraynta dhulka dawladda. Si la xisaabtan loogu muujiyo dadweynaha, lama cadayn ama lama sheegin waxa uu yahay dhulka ay dawladdu leedahay (lama qeixin waxa dawladi tahay), iyo sida dawladdu u maamulayso qaybinta dhulka haday tahay mid gaar loo isticmaalayo ama ganacsiba.

3.14 Baaq Siyaasadeed (Policy statement):

Dawladdu waxay hayn doontaa maamuli doontaana dhulka dowladda ee ay awoodda u leedahay dawladda dhexe ama ta hoose iyada oo u haynaysa (in trust for) dadka Somaliland waxanay samayn doontaa qaab—dhismeed sharci oo dhaki doona qaadashada, isticmaalka, maamulidda iyo siidaynta/tanaasulka (disposal) dhulka dawladda Dawladdu waxay samayn doontaa guddi baadhis oo baadhi doona dhammaan-dhulka dawladda waxanay samayn doontaa nidaam ay kula soo noqodoto wixii dhul dawladeed ah ee lagu qaatay si'aan caadi ahayn ama sharci ahayn

3.15 Istraatiijiyadda (Strategies):

Si loo ilaaliyo dhulka dawladda, dawladdu waxay: Samayn doontaa guddi dhuleed si'ay u hayaan una maamulaan dhulka dawladda iyadooou haynaysa (in trust for) dadka Somaliland Waxay cayimi

doontaa kana hayn doontaa liis, saarfay iyo khariidadda dhamaan dhulkadawladda Dejin doontaa xeerlagu maamulayo khasab ku qaadashada dhulka si loo hubiyo in dhulkaaloo qaatay dan guud kaliy sidoo kalana la baxshay magdhaw cadaalad ah oo dhakhso ah oola siiyo dhammaan dadkii amma bulshooyinkii arrintaasi saamaysay. Dawladdu waxay iswaafijin doontaa qaab—dhismeedka hay'adeed ee khasab ku qaadashadadhulka si ay uga hortagto isdhexgelidda awoodaha (overlapping), shuruudaha, hababka iyohabraaca kuwaasoo ah kuwo kusalaysan cadaalad, karti, daah—furnaan iyo laxisaabtan Waxay dib usoo ceshan doontaa dhulka dawladda ee lagu bixiyey ama lagu qaatay siaan caadi ahayn ama sharci ahayn

3.16 Maamulka dhulka magaalooyinka

Inkastoo boqolkiiba 53% dadka Somaliland ku nool yihiin magaalooyina iyo degmooyin/tuulayaal yar yar oo baadiyaha ah, shuruucda loogu talo galay in lagu maamulo dhulka magaalooyinka waxa kujira is—burin. Wasaaradda arrimaha guduuhu waxay qabanaysaa shaqo kabadan tii laga rabay, guddiga qaran ee qorshaynta dhulkuna maaha mid wax—ku—ool ah.

Heer degmo, dawladaha hoose ayaa maamulaya dhamaan dhulka noocyadiisa, soo saaraya siin cusub (new titles), waxay leeyihiin hab liita oo loo maamulo xogta, waxay diiwaanka kuhaystaan nuqulo aan dhamaystirayn, waxana ka maqan awoodii ay kusamayn lahaayeed diiwaan gelinta iyo cadaynta dhulka. Heer dawlad dhexe, ma jiro diiwaan dhul maadaama oo wasaaradda hawlahu guud aanay ka helin nuqulo dawladdaha hoose. Maqnaanshiyaha qorshe guud oo kadhashay awood darradda xirfadda dhulka ayaa waxay abuuray magaalooyin buuxdhaaf ah (urban sprawl) oo iyaduna dhashay nidaamka cashuur qiimaynta iyo ururinta liita ee hadda jira, ganacsiyeynta iyo buunbuuninta dhulka magaalooyinka kuwaasoo ah sababaha ugu waawaeyn ee keenay dhul la'aanta inta badan magaalooyinka kajirta. Xaaladda dhul la'aanta e jirta ayaa sabab u ah inay samaysmaan degaamo aan caadi ahayn (informal settlements) kuwaasoo keeni kara mushkilado deegaan, bulsho, caafimaad iyo qorshaynba.

3.16.1. Baaq Siyaasadeed (Policy statements):

Dawladdu waxay ku cadayn doonta xeerka dhulka "Land Act" awoodda, qaab- --dhismeedka iyo xidhiidhka ka dhexeeya hay'adaha kala duwan ee qorsheynta iyo maamulka dhulka magaalooyinka Dawladdu lama wareegi doonto wax dhul ah marka laga reebo haddii sababtu tahay danta guud ah taasoo ku xidhan bixinta magdhaw deg—deg ah, cadaalad ah, kuna filan. Dawladu waxay dhulka

kuyaal magaaloooyinka ku soo rogi doontaa cashuur si loo xakameeyo buunbuuninta dhulka (speculation in land) Dawladdu waxay hubin doontaa in dhamaan dadka ku nool degaamada aan cadiga ahayn iyo xeryaha barakacayaashu inay ka helaan damaanad qaad xuquuq dhul ama dhul ay iibsan karaan

3.16.2 Istaraatajiyadaha (Strategies)

Si laisku waafajiyo shuruucda dhulka magaaloooyinka ee jira, waxa lafulin doonaa tafatir sharci oo dhamays tiran si loo ogado is—burinta, is—dhexgalka iyo gol—dalooloooyinka Si loo sameeyo qorshayn dhamays tiran iyo horumar habaysan, dawladuu waxay samayn doontaa:

Siyaasad qaran oo magaaloooyin Siyaasad qaran oo guriyeyn Dawladdu waxay dib u eegaysaa shuruucda iyo xeerarka qorshynta magaaloooyinka iyo horumrinta dhulka si ay ula jaan—qaadaan siyaasaddan Ayadoo isticmaalaysa hay'adaha dawladda, waxay abaabuli doontaa oole wacyigelin dadweyne si dadweynaha loogu wacyigeliyo isticmaalka iyo maamulka dhulka magaaloooyinka

3.17 Suuqyada kala libsiga iyo Maalgashiga Dhulka

Dhulka suuqa aan xeerka loo dejin ee Somaliland wuxuu wadada u furay bunbuunin (speculation) iyo in dhulka la booboo. Dhul la'aanta kajira magaaloooyinka iyo dhul daaqsimedka sii yaraanaya ee baadiyaha ayaa ah dhibaatooyinka ka dhashay xeer la'aanta maadaama oo dadku ay u heelanyihii inay dhul ku qaataan sikasta oo ay ugu suurto gelayo. Waxaan kala cadayn xaqaa lahaanshiyo ee maalgashadayaasha shisheeye. Maqnaanshiyaha xaqaa lahaanshiyaha iyo mudada lahaanshiyuhu waxay sababi kartaa in si joogto ama abid ah dhulka u qaataan maalgashadaaysha shesheeyuhu.

3.17.1 Baaq Siyaasadeed (Policy statements):

Dawladdu waxay xeer u dejin doontaa dhulka suuqyada si ay u hubiso waxtar iyo cadaalad Dawladdu waxay hubin doontaa u qaadashada dhulka ujeedooyin maalgashi ay waafaqsan tahay ujeedooyinka horumarka heer qaran Istaraatajiyadaha (Strategies) Dawladdu waxay fududeyn doontaa is bedelidda iyo wareejinta (transmission) xuquuqda iyo danaha dhulka iyadoo aan wax u dhirriahayn damaanadda lahaanshiyaha ee shakhsiyadka iyo bulshooyinka Dawladdu waxay samayn doontaa nidaam macluumaad dhul oo shaqeynaya waxanay bixin doontaa macluumaadka dhulka la xidhiidha oo tayadiisu fiicantahay iyo kaabayaashii lagu heli lahaa macluumaadka

Dawladdu waxay sharci u dejin doontaa hawlahaa jilayaasha aan dawladda ahayn ee kujira suuqa dhulka gaarahaan nootaayooyinka iyo dilaaliinta Dawladdu waxay samayn doontaa istaraatajiyad ay ku hogamiso dawladda iyohay'adaheeda ku lug leh dhulka maalgashiga, oo ay ka mid yahay talaabooyin ay:

Dawladdu waxay waxkabadal ku samayn doontaa sharciga maalgashiga shisheeye si, marka laga yimaado arimaha kale, loo cadeeyo xuquuqda lahaanshiyaha iyo mudada lasiiyey dhulka maalgashadaayaasha shesheeye Dawladdu waxay hubin doontaa inaan bixinta xuquuqda dhulka ee lasiiyo dadka aan muwaadiniinta ahayn ka xayuubin dadka degaanka xaqa ay u leeyihin dhulkooda. Dawladdu waa in ay hubiso in bulshooyinka degaanku ay qaybtooda ka helaan faa'iidooyinka ka soo noqda maalgashiga lagu sameeyo degaanadooda.

CUTUBKA AFRAAD: QORSHABA FULINTA SIYAASADDA QARAN EE DHULKA

4.0 QORSHABA FULINTA SIYAASADDA QARAN EE DHULKA

Arrinta ugu muhiimsan ee horseedi karta in guul laga gaadho helitaanka siyaasad dhul oo hano—qaaddaa waxaa weeye in qorshe meel—mar ah oo dhammaan qaybaha kala duwan koobaaya la diyaariyo. Wuxuu taas ka mid ah in ladiyaariyo Xeerarka ku habboon, abuurista hay'adaha ugu habboon iyo diyaarinta qorshe dib loogu habaynaayo oo la fuliyo. Si hawshaas loo fuliyo waxaa muhiim ah in tixgelin gaar ah la siiyo in hawlahaa la bilaabo iyadoo lala tashanaayo dhammaan daneeyeyaasha oo ay ka mid yihii Xukuumadda, Baarlamaanka, dawladaha hoose, bulshada rayidka ah iyo bulsho weynta kale.

4.1 FULINTA QORSHE—HAWLEEDKA (ACTION PLAN)

Baaq Siyaasadeed (Policy statement): Dawladdu waxa ay ka mas'uul tahay in la diyaariyo Qorshe—hawleedka lagu fulinaayo Siyaasadda Qaran ee Dhulka.

4.1.1 Isteraatijiyadda (Strategies):

Si loo xaqijiyo fulinta Siyaasadda Qaran ee Dhulka, Wasaaradda Hawlahaa Guud, Dhulka Iyo Guriyaynta ayaa ka masuul noqonaysa hoggaaminta fullinta siyaasada Dhulka. Waxana digreeto Madaxweyne uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland ku magacaabi doonaa Guddiga khilaafaadka arimaha Dhulka oo ay Wasaaradda Hawlahaa Guud, Dhulka Iyo Guriyayntu guddoomin doonto. Guddidaasi oo ka kooban 8 wasaaradood oo kala ah;

1. Wasaaradda Hawlahaa Guud, Dhulka Iyo Guriyaynta

2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha
3. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cilimilada
4. Wasaaradda Horumarinta Beeraha
5. Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Iyo Horumarinta Kalluumaysiga
6. Wasaaradda Horumarinta Reer miyiga
7. Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta
8. Wasaaradda Diinta Iyo Awqafta

Xukuumaddu waxay u qoondayn doontaa kharash si loo dhaqaajiyoo fulinta qorshaha. Intaas waxaa dheer, Qorshe hawleedku waa in uu suurto geliyaa in la dhiso aqoonta shaqaalaha islamarkaana fududeeyaa sidii maaliyaddii Siyaasadda lagu fulinaayay lagu heli lahaa. Dawladdu waxa ay soo jeedin doontaa jadwalka diyaarinta Xeer cusub sida "Xeerka Dhulka" oo xilliyaysan.

Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka Iyo Guriyayntu waan in ay Qaaddo tallaabooyin is xigxiga oo la xidhiidha meel—marinta siyaasadda oo ku salaysan hormayn is—xigxigta sidoo kalena samaynta odoroska kharashaadka ay ku kacayaan dhammaan barnaamijyada la qorsheeyay iyo hawl—qabadyada la filayo ee la xidhiidha siyaasadda In tilmaan laga bixiyo qabdhismeedka hay'adeed iyo maamul ee lagama maarmaanka u ah fulinta dib u habaynta la soo jeediyay. In la hubiyo in kharashka loo baahanyahay si siyaasadda loo fuliyaa uu yahay mid si ku jira miisanayadda qaybna ka ah qorshaynta qaranka.

Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka Iyo Guriyayntu waa in ay fududaysaa diyaarinta dhammaan Xeerarka muhiimka u ah fulinta siyaasadda qaran ee dhulka; Xukuumaddu waa in ay diyaarisaa dhammaan kharashka iyo adeegyada kale ee loo baahan yahay iyadoo xulaysa dhinacyada muhiimka ah ee si waxtar leh oo hufan uga qayb qaadan kara maalgelinta, meel marinta iyofulinta siyaasadda dhulka; Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka Iyo Guriyayntu waa in ay shaqaalaysaa islamarkaana xir faddooda kor u qaaddaa shaqaalaha muhiimka ah ee ka shaqaynaaya fulinta siyaasaddan; Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka Iyo Guriyayntu waa in ay abaabushaa ololaha wacyi—gelinta iyo hanuuninta dadweynaha oo loo qabanaayo daneeyeyaasha (siyaasadda dhulka) Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka Iyo Guriyayntu waa in ay dabagashaa meelmarinta iyo fulinta siyaasadda dhulka.

4.1.2 WACYI—GELINTA DADWEYNAHA IYO QAYBINTA SIYAASADDA DHULKA

Waxaa loo baahan yahay in la bilaabo barnaamij ballaadhan oo lagu wacyi—gelinaayo dadweynaha laguna baraayo siyaasadda dhulka si dhammaan daneeyeyaashu ay u fahmaan.

4.1.3 Baaq Siyaasadeed (Policy Statement):

Dawladdu waa in ay Siyaasadda Qaran ee Dhulka u qaybisaa dhammaan daneeyeyaasha.

4.1.4 Isteraatijiyyadda (Strategies):

Si loo hir—geliyo wacyi—gelinta Siyaasadda Qaran ee Dhulka, dawladdu waa: In ay Siyaasaddan u turjunto af—Soomaali; In ay dejiso istaraatijiyyad qaran oo wacyiga lagu abuurayo In ay diyaariso qoraalo iyo dokumentiyo lagu wacyi—gelinaano waxna lagu baraayo dadweynaha; In ay tababarto, dhistona aqoonta bulshooyinka deegaanka iyo hoggaamiyeyaasha dhaqanka si ay u fahmaan Siyaasadda Qaran ee Dhulka; In ay siyaasadda u qaybiso dhammaan daneeyeyaasha. La socodka, Qiimaynta iyo Dib—u—eegista Waa in la abuuro nidaamkii iyo habkii lagula socon lahaa (monitoring) laguna qiimayn lahaa horu—marka iyo waxtarka (wax—ku—oolnimada) baaqyada siyaasadeed iyo Isteraatijiyyadaha lagu gaadhayo yoolka, hiigsiga iyo ujeeddooyinka siyaasaddan.

4.1.5 Baaq Siyaasadeed (Policy Statement):

Dawladdu waa in ay diyaarisaa qaab—dhismeedkii lagula socon lahaa, lagu qiimayn lahaa islamarkaana dib loogu eegi lahaa fulinta Siyaasadda Qaran ee Dhulka.

4.1.6 Isteraatijiyyadaha (Strategies):

Si loo sameeyo habka la socodka iyo qiimaynta, dawladdu waa:

- b) In ay dabbaqdaa ama adeegsataa tuseyaal muujinaaya in habka la socodka iyo qiimaynta la isticmaalay;
- t) In ay diyaariso qaabka ku habboon ee siyaasadda lagu sii qurxin karo dibna loogu eegi karo;
- j) In ay u adeegsato xogta laga helayo la—socodka qiimaynta inta laga hirgaliyay aragtidii, yoolkii iyo ahdaaftii siyaasadda dhulk